BUUG-GACMEEDKA/WAAXDA	Buug-gacmeedka maamulka
MULKIILAHA DUKUMEENTIGA	Suanne Kindel (Hawlgallada Mgr)
TAARIIKHDA ASALKA	12/01/2015
TAARIIKHDA U DAMBE EE DIB U EEGIDDA	01/31/2022
WAXAA ANSIXIYAY	Jeffrey Harrington (Madaxa dhaqaalaha ee SVP)

UJEEDADA

1. Si loo qeexo sida bukaanada loo go'aamiyay inay u qalmaan Caawimaada Dhaqaalaha si waafaqsan Isbitaalka Carruurta ee Colorado's (CHCO's) siyaasadda iyo sharciyada IRS-ta Aan-Midabtakoorka Bukaanada Lahayn
2. Si loo habeeyo nidaamka si loogu qiimeeyo awooda bukaanka/qoyska uu u leeyahay bixinta adeegyada iyo in CHCO ay ka soo ururiso lacagaha saxda ee ka dhanka ah bukaanada/qoysaska iyadoo lagu salaynayo u qalmitaankooda iyo hagitaanada Faqriga ee Dowlada dhexe/Gobolka.
3. Si loo qeexo siyaasadda loogu talagalay biilida iyo ururinta lacagta ka socoto bukaanada/qoysaska ka bixinaya daryeelka caafimaadkoosa iyada oo la xaqiijinaayo in CHCO ay haysato hab macquul ah oo ay ku soo ururiso lacagaha deynta ah ee lagu leeyahay.

BAAXADA/SHAQAALAHA

Dhammaan xubnaha kooxda CHCO ee ku sugan dhammaan goobaha CHCO iyo dhammaan bukaannada lagu daaweeyey goob kasta oo CHCO ka tirsan.

Qeexitaano

Koontooyinka Lacagta lagu leeyahay (A/R)	Lacagta ay macaamiisha ku leeyihiin CHCO si ay ugu badelaan daryeelka iyo adeegyada la gaarsiyey ama la isticmaalay, laakiin aan weli la bixinin.
Deyn Xun	Lacagta deynta ah ee koontada iyada oo ku salaysan adeegyada la siiyo bukaanka kaas oo loo tixgeliyo mid aan laga soo qaadi karin, ka dib dadaal ururin macquul ah oo da'diisu gaartay ugu yaraan 120 maalmood laga bilaabo taariikhda CHCO ay bixisay bayaanka biilasha ka soo saarida ka dib ee ku aadan daryeelka, si waafaqsan Sharciyada qaybta IRS 501(r).
Barnaamijka Daryeelka Sadaqada Carruurta	Barnaamijka CHCO kaas oo bixiya Caawimaada Dhaqaalaha ee loogu talagalay bukaanada aan Caymiska lahayn ama Caymiska ka go'an yahay oo muujiyay baahi dhaqaale.
U qalmitaanka deganaanshaha Colorado	Caddaynta muujineysa degenaanshaha waxay ugu baahan tahay codsadayaasha inay bixiyaan biilasha tasiilaadka ama taleefoonka, heshiiska kiraynta ama qoraalka amaahda guryaha, xiriirka ka socda dugsiga ilmaha, kaararka aqoonsiga (tusaale ahaan, ruqsada darawalnimada, aqoonsiga gobolku bixiyo), bayaanka bangiga, ama warqada taageerada ah oo ka socoto xubin ka tirsan qoyska ama saaxiib.
Aan caadi ahayn Tallaabooyinka Ururinta (ECA)	ECAs waa tallaabooyin ay CHCO ka qaado shakhsiga la xiriira helitaanka lacag bixinta biilka loogu talagalay daryeelka lagu daboolay si waafaqsan CHCO's FAP kaas oo u baahan hannaan sharci ama garsoor (marka laga reebo hanti la wareegida qaarkood ama sheegashooyinka musalafka ah), waxay ku lug leedahay ka iibinta shakhsiga deyntiisa koox kale marka laga reebo hadii ay jirto muddo qandaraas ah oo lagu heshiyey, ama ay ku lug leedahay u sheegida macluumaadka xun ee shakhsiga ku saabsan oo loo sheego hay'adaha warbixinta deymaha ee macaamiisha ama xafiisyada deymaha (guud ahaan, hay'adaha deymaha).
Caawimada Dhaqaalaha	Ku bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka si bilaash ah ama qiimo dhimista sicirka ee la siinayo shaqsiyaadka buuxiya shuruudaha lagu dejiyay Siyaasaddan Caawimaada Dhaqaalaha.

Dhaqaale Siyaasadaha Caawimaada (FAP)	Siyaasaddan, taas oo sharraxaysa: • Xeerarka u qalmitaanka ee loogu talagalay caawimaada dhaqaale iyo haddii caawimaada noocan ah ay ku jirto daryeelka bilaashka ah ama qaymo dhimis lagu sameeyey; • Caawimaada dhaqqale iyo qiimo dhimisyada ay heli karaan shakhsiyaadka u qalma; • Gundhiga loogu talagalay xisaabinta cadada lagu dalacayo bukaanada; • Habka loogu talagalay codsashada Caawimaada Dhaqaale; iyo • Liiska bixiyayaal kasta oo daryeel ku bixinaya isbitaalka dhexdiisa iyo kuwaas, haddii ay wax jiraan, ay daboolayso xarunta FAP iyo kuwaas oo aan ahayn.
Heerka Saboolnimada Dowlada dhexe (FPL)	Qiyaasta heerka dakhliga ee ay sannad kasta bixiso Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha. Heerarka saboolnimada dowlada dhexe ayaa loo isticmaalaa si loogu go'aamiyo u qalmitaanka ku aadan barnaamijyada dawladda qaarkood iyo dheefaha. Hagitaanada Saboolnimada Dowlada dhexe waxaa si sanadla ah u daabaca Dowladda Federaalka.

Barnaamijka Dowladda	Qorsha kasta ama barnaamij kasta oo bixiya dheefaha caafimaadka, ha ahaato si toos ah, iyada oo loo marayo caymis, ama haddii kale, kaas oo si toos ah, gabi ahaan ama qayb ahaanba ay u maalgeliso, dawladda Maraykanka ama barnaamijka daryeelka caafimaadka ee Gobolka (tusaale, Medicaid, Qorshaha Caafimaadka Carruurta [CHP+]), marka laga reebo Barnaamijka Dheefaha Caafimaadka Shaqaalaha Dowladda Dhexe.
Dammaanad qaade	Qofka ama hay'adda ogolaatay inay noqoto kooxda mas'uul ka ah dhaqaalaha iyo/ama si sharci ah u oggolaan kara daryeelka iyaga oo saxiixaya foomka Heshiiska Oggolaanshaha
Bayaanka Dammaanad qaadaha	Biilka loogu talagalay daryeelka la bixiyay. Waa soo koobid biilasha iyo macluumaadka lacag-bixinta ee ku saabsan koontooyinka bukaanka ee ku xiran hal dammaanad qaade.
Dhakhliga	Waxaa ka mid ah kasabyada, gunnada shaqa la'aanta, gunnada shaqaalaha, Amaanka Dabagalka Bulshada, dakhliga amaanka ee dheeraadka ah, kaalmada dadweynaha, lacagaha la siiyo halyeeyada, dheefaha badbaadaha, lacagta hawlgabka la siiyo ama dakhliga hawlgabka, dulsaarka, qaybinta, kirooyiinka, gadashada adeegsiga hantida shaqsi kale, dakhliga ka soo baxa ma guurtada, ammaanada, kaalmada waxbarashada, masruufka, taageerada ilmaha, kaalmada guriga ka baxsan, iyo ilooyinka kale ee kala duwan. Dheefaha aan lacagta caddaanka ahayn (sida kaararka cuntada iyo kababka guryaha) kuma jiraan Dakhliga. Dakhliga qoyska waxa la xisaabiyaa canshuurta ka hor waxana meesha laga saaraysa faa'iidada raasumaalka ah ama khasaaraha aan la xaqiijin. Dakhliga waxaa ku jiri kara dakhli kale oo aan la kasban kaasoo ah lacag caddaan ah oo la xisaabin karo oo laga helay ilo aan ahayn shaqo.
Caalami Shakhsi	Qof kasta oo qaata adeegyada buuxiya mid ka mid ah shuruudaha soo socda: • Aan Maraykan ahayn muwaadin wata aan Maraykan ahayn caymiska aan ku noolayn Wadanka Maraykan gudihiisa ama Maraykan dhulka • Aan Maraykan ahayn muwaadin haysta Maraykanka caymiska aan ku noolayn wadanka Maraykan gudihiisa ama Maraykan dhulka • Aan Maraykan ahayn muwaadin aan lahayn caymis oo aana ku noolayn Maraykanka ama Maraykan dhulka Aan Maraykan ahayn muwaadin ay kafaalo qaadeyso safaarad shisheeye
Hantida Dareeraha ah	• Hantida loo badeli karo lacag caddaan ah muddo gaaban oo habboon gudaheeda, guud ahaan 30 gudahooda Tan waxa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, hubinta koontooyinka, koontooyinka kaydinta, koontooyinka aamanaadda (haddii lacagaha isla markiiba la heli karo), qiimaha lacagta caddaanka ah ee caymiska nolosha, Shahaadooyinka Dhigaalka muddada-gaaban (CD-yada) iyo dakhliga iskaashiga ee kaydka lagu hayo. Koontooyinka hawlgabka iyo Gunnooyinka Gabaadka u ah Canshuurta waa ilo dareere ah, haddii codsadaha uu kala soo bixi karo dhaqaalaha koontada isaga oo ganaax la'aan ah.
Caafimaadka Gurmadka degdega ah	Dhaawac ama xanuun kaas oo aad u daran oona halis degdeg ah u leh nolosha qofka ama caafimaadka muddada dheer.
Lagama maarmaanimada Caafimaadka	Adeeg la daboolay ayaa loo arki doonaa mid caafimaad ahaan lagama maarmaan ah haddii, si waafaqsan heerarka la aqbalay ee ku dhaqanka caafimaadka, la ogaado in ay tahay daweyn isku mid ah oo wax ku ool ah oo ka mid ah xulashooyinka kale ee muxaafidka yar ama ka karash badan, oo uu la kulmo ugu yaraan mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

/ Caafimaad ahaan Lama huraan ah	Adeegga wuxuu ahaan doonaa, ama si macquul ah loo filayaa inuu: • ka hortago ama ogaado bilawga jirada, xaalad, naafanimada aasaasiga ah ama naafanimada sare; • daweeyo, saxo, yareeyo ama wanaajiyo saamaynta jirka, maskaxka, garashada ama korritaanka xanuunka, dhaawaca ama naafanimada; • yareeyo ama hagaajiyo xanuunka ama rafaadka ay keento jirada, dhaawaca ama naafanimada; • ka caawiyo shakhsiga si uu ugu guuleysto ama loo ilaaliyo awoodda ugu badan ee shaqada ee ku aadan fulinta hawlaha nolol maalmeedka.
Khidmada aan caymiska lahayn	Khidmadaha ku baxay ee loo arko in aysan ahayn dheef caymis leh marka loo eego caysanaha bukaanka/damaanad qaadaha.
Iskii u bixinta	Bukaanka ma haysto, ama wuxuu doortay in uusan isticmaalin, caymis ganacsiga, caymiska barnaamijka dawladda, ama Caawimaada Dhaqaale oo kale. Marka la joogo waqtiga biil bixinta, qiimo dhimis 35% ah ayaa lagu dabaqi doonaa dhammaan haraayada iskii u bixinta.
Caymisku ka go'an yahay	Dammaanad qaadaha waxaa uu leeyahay xoogaa heer caymis ah ama caawimaada garab saddexaad laakiin weli waxa uu leeyahay kharashyo ka baxsan ama ka tirsan jeebka oo ka sarreeya awooddiisa/deeda in uu wax bixiyo.
Aan caymis lahayn	Dammaanad qaadaha ma laha wax caymis ama caawimaada garab saddexaad ah si ay ugu taageerto buuxinta waajibaadkiisa/keeda lacag bixinta.

MACLUUMAADKA GUUD

1. CHCO waxaa ka go'an in ay siiso Caawimaad Dhaqaale dadka qaba baahiyaha daryeelka caafimaad oo aan Caymis ku jirin, u Caymiska ka go'an yahay, aan u qalmin Barnaamijka Dowladda, ama haddii kale aan awoodin in ay iska bixiyaan daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah iyada oo ku saleysan xaaladdooda dhaqaale ee gaarka ah.
2. Iyada oo la raacayo hadafka CHCO ee hormarinta caafimaadka carruurta iyada oo loo maraayo bixinta tayada sare, barnaamijyada isku dubaridan ee daryeelka bukaanka, waxbarashada, cilmi baarista iyo u doodista, CHCO waxay ku dadaaleysaa in ay xaqiijiso in awoodda dhaqaale ee dadka u baahan adeegyada daryeelka caafimaadka aysan ka hor istaagin inay raadsadaan ama qaataan daryeelka. CHCO waxay bixin doontaa, midabtakoor la'aan, daaweyn si loogu dejiyo xaaladaha caafimaad ee degdega ah ee ku aadan shakhsiyaadka iyada oo aan loo eegayn u qalmitaankooda ku aadan Caawimaada Dhaqaalaha ama caawimaada dawladda, si waafaqsan EMTALA.
3. Si loo ilaaliyo awoodda CHCO ay ugu adeegto baahiyaha daryeelka caafimaadka carruurta ee bulshada, shaqsiyaadka aan caymiska lahayn ama kuwa uu caymiska ka go'an yahay ee doonaya mid jadwalaysan, xaalad degdeg ah oo aan caafimaad ahayn laakiin adeegyada Lagama maarmaanka ah ee Caafimaad ayaa loo qiimayn doonaa dhaqaale ahaan ka hor inta aan adeegyada la helin. Haddii uu bukaan soo bandhigo xaalad degdeg ah ama xaalad dhakhsa wax ka qabasho rabto, go'aaminta baahiyaha Caawimaada Dhaqaale waxay dhici doontaa xasilinta iyo daawaynta ka dib. Booqo EMTALA Xeerka Daawaynta Caafimaadka Degdegga ah iyo Shaqada).
4. Barnaamijka Daryeelka Danyarta ee Colorado (CICP) iyo Barnaamijka Samafalka CHCO ma aha barnaamijyo caymis, laakiin waa barnaamij qiimo dhimis leh oo loogu talagalay kuwa aan caymis haysan ama uu caymiska ka go'an yahay oo muujiyay baahi dhaqaale.
5. CHCO kama qaybqaadan doonto mana taageeri doonto hawl kasta (oo ay ku jirto helitaanka warbaahinta) ee la xiriira dadaallada qaaraan ururinta ee loogu talagalay in lagu bixiyo daryeelka bukaan gaar ah.
6. Barnaamijka Daryeelka Samafalka ee CHCO looma isticmaali karo kharashyada la xiriira guri-siinta, cuntada, gaadiidka, xaalada socdaalka, ama adeegyada/agabyada la xiriira sii wadida daryeelka (tusaale, qalab caafimaad oo waara, daryeelka guriga).
7. CHCO waxay diyaar u tahay inay gacan ka geysato aqoonsiga agabyada ku salaysan bulshada, fududaynta adeegyada, iyo bixinta caawimaada gudbinta ku haboon. La taliyaha Dhaqaalaha waxaa lagala xiriiri karaa 720-777-7001.
8. CHCO kuma qasbana inay bixiso Caawimaada Dhaqaalaha ee aan ahayn adeegyada Gurmadka degdegga ah ee Caafimaadka.
9. CHCO waxay ku dhaqantaa sida waafaqsan Xeerka Dib loo eegay ee Colorado § 25-3-112 iyo 26 CFR 1.501(r) -0 illaa 26 CFR 1.501(r) -7.
10. Nuqullada ka mid ka ah FAP-gan ayaa lagu heli karaa luqado badan, oo ay ku jiraan Ingiriiska iyo Isbaanishka.

Siyaasadda

1. Shuruudaha U qalmitaanka Caawimaada Dhaqaalaha
   A. Qaanuunka U qalmitaanka Caawimaada Dhaqaalaha
      1) Dakhliga codsadaha(yaasha), iyada oo la tixgalinayo Hantiyada Dareeraha ah, waa in uu ka hooseeyaa 250%, ama xaalado xaddidan oo lagu qeexay baaragaraafka 2-aad ee ka hooseeya 500%, ee FPL.
      2) Caawimaada Dhaqaalaha ee loogu talagalay adeegyada Gurmadka Degdegga ah ee Caafimaadka ayay heli karaan dhammaan bukaannada.
      3) Caawimaada Dhaqaalaha ee loogu talagalay Xaalada aan Degdeg ahayn ee Caafimaad laakiin daryeelka Caafimaad ahaan Lagama maarmaanka ah waxa heli kara oo kaliya Shakhsiyaadka aan Caalamiga ahayn:
         a. Dadka deegaanka u ah Colorado ee da'doodu tahay 14 iyo ka yar (dadka deegaanka u ah Colorado ee da'doodu ay ka weyn tahay 14 ayaa laga yaabaa inay u qalmaan laakiin waxay u baahan doonaan anisixinta maamulka); iyo
         b. Shakhsiyaadka bixin kara caddaynta degenaanshaha Colorado laakiin aan bixin karin dukumeentiga caddaynta Maraykanka dhalashada Maraykanka waxay u qalmi karaan laakiin waxay u baahan doonaan ansixinta maamulka.
      4) Barnaamijka Daryeelka Samafal ee CHCO waxa kaliya oo u dhaqmi doona sidii bixiyaha aasaasiga ah haddii bukaanka uusan caymis lahayn oo uusan u qalmin barnaamij kasta oo dawladda ay leedahay. Haddii shakhsiga kaliya u haysto Medicaid degdeg ah oo loogu talagalay nolosha bukaan-jiifka ama xaalad khatar oo lugaha ah, waxyaabo ka reeban ayaa laga yaabaa in la sameeyo, codsadahana waxa uu xaq u yeelan karaa Caawimaada Dhaqaale.
      5) Barnaamijka Daryeelka Samafalka ee CHCO waxaa uu u dhaqmi karaa sidii bixiyaha labaad haddii bukaanka uu leeyahay caymis ganacsi laakin uu caymiska ka go'an yahay. Caymiska labaad waxa laga yaabaa inay bixiso yareynta qadarka lacagaha la wada bixiyo, la jari karo, iyo kala barida caymisyada. Intaa waxa dheer, Barnaamijka Daryeel Samafalka ee CHCO waxa kale oo loo isticmaali karaa dacwadaha marka dheefaha caymiska ay dhammaadaan oo adeegyada loo arko inay lagama maarmaan yihiin (tusaale, PT/OT, EDU, Maqalka, Adeegga Hadalka iyo Waxbarashada).
      6) Codsi dhammaystiran oo loogu talagalay Caawimaada Dhaqaalaha ee CHCO ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo u qalmitaanka.
         a. Macluumaadka loo baahan yahay si loo go'aamiyo u qalmitaanka Caawimaada Dhaqaalaha waxaa ay ku qoran tahay codsiga.
         b. Haddii Caawimaada Dhaqaalaha loo isticmaali doono in lagu daboolo taariikhihii hore ee adeegga, bukaanka/qoyska waa in ay ku caddeeyaan codsiga caawimaada noocaas oo kale ah codsiga dhexdiisa.
      7) Muddada Codsiga
         a. Codsiga waa in lagu soo buuxiyaa 365 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda ugu horraysa ee bayaanka biil bixinta soo saarida kadib oo loogu talagalay daryeelka la bixiyay. Adeegyo kasta oo la bixiyo in ka badan 365 maalmood ka hor taariikhda codsiga ma noqon doono mid u qalma Caawimaada Dhaqaalaha.
         b. Haddii codsi aan dhamaystirnayn lagu soo gudbiyo muddada codsiga, shakhsiga waxaa lagu wargelin doonaa wax ku saabsan macluumaadka maqan, sida loo helo caawimaada, waxaana uu haysan doonaa 60 maalmood inuu ku buuxiyo codsiga ka hor inta ECA-yadu aysan dhicin. Haddii ECA-yadu ay hore u bilaabmeen, CHCO waxay joojin doontaa ECA-yada inta lagu jiro muddada maalinta 60-aad.
   B. Haddii codsi dhammaystiran la helo, ECA-yada waa la hakin doonaa ilaa inta laga gaarayo go'aan ku saabsan u qalmitaanka ku aadan Caawimada Dhaqaale iyo, haddii qofka la ogaado inuu u qalma, ECA-yada waa laga laaban doonaa, lacag celin ayaa la samayn doonaa, iyo haddii qaddarka weli lagu leeyahay bayaan ayaa la soo saari doonaa oo soo bandhigaayo sida lacagtaas loo go'aamiyay.
      1) Ka Reebanaanta Shahaada siinta Xarunta Cusub. Haddii ay dhacdo in la sugo lambarka shahaadeynta CMS (CCN), sida xarun cusub oo isbitaal ah ama meel kale oo u baahan shahaado gaar ah, meeshaas waxaa laga yaabaa inay caysanayaasha u kala saaraan shabakada ka baxsan (aan weli qandaraas kula galin CHCO goobtaas) muddo gaaban oo daba taalo taariikhda dhaqangalka ah ee CCN. Sidaa darteed, mudda 120 maalmood ka dib taariikhda dhaqangalka ah ee CCN, labadaba bukaannada Iskood u bixiyo iyo bukaannada leh daboolista caymiska taas oo goobta cusub ay tahay mid ka baxsan shabakada helitaanka adeegyada goobta cusub ee la shahaada-siiyey waxay xaq u yeelan doonaan Caawimaada

Dhaqaale haddii Dhakhliga codsadaha (yaasha) uu ka hooseeyo 500% FPL iyada oo lagu salaynayo tirada qoyska. Caymiska bukaanka wali waa lagu soo dalacayaa, caynsanahana waa inuu habeeyaa ama dafiraa sheegashada, isaga oo ka tagaya haraaga bukaanka. Dhammaan shuruudaha u qalmitaanka iyo caddaynta Dakhliga ayaa wali lagu dabaqaayaa. CHCO waxay sameyn doontaa dhammaan dadaallada macquulka ah si ay u aqoonsato bukaannada u qalmi kara ka reebitaanka inta lagu guda jiro muddada waqtiga ee 120-ka maalmood ah. Marka ay ka soo wareegto 120 maalmood ka dib taariikhda dhaqangalka CCN, halbeega u qalmitaanka ayaa ku noqon doona 250% ee caadiga ahaa ee FPL iyada oo lagu saleynaayo tirada qoyska, iyada oo aan loo eegin in qorshaha caymiska bukaanku uu ku jiro shabakada ama uu ka baxsan yahay shabakada, sida laga soo xigtay shuruudaha la aasaasay ee u qalmitaanka (qaybta 1.E).

C. Filashooyinka loogu talagalay bukaanada u qalma Caawimaada Dhaqaalaha sida ku cad Barnaamijka Daryeelka Samafalka ee CHCO. Codsadaha(yaasha)waa inay:
   1) Ogaysiiyaan CHCO haddii uu jiro isbadel xagga dhaqaalaha iyo/ama xaalada caymiska ah; ku guuldareysiga in sidaas la sameeyo waxay keeni kartaa ka joojinta barnaamijka;
   2) Bixiyaan lacagta canshuurta(ada) ee ku qoran jadwalka ku lifaaqan wakhtiga adeegga; iyo 3) Keenaan kaarka aqoonsiga Barnaamijka Daryeelka Samafalka ee CHCO booqasho kasta.

D. Shuruudaha U qalmitaanka Caawimaada Dhaqaalaha – Bukaanada uma qalmaan Caawimaada Dhaqaalaha haddii: 1) CHCO ay go'aamiso ama ay aqoonsato in bukaanka/qoyska ay bixiyeen macluumaad been ah.
   2) Bukaanku ma ahan qof deegaan u ah Colorado/waa Shakhsi Caalami ah oo daryeelka loo baahan yahay ma aha sababo la xiriira xaalad degdeg ah oo caafimaad. Qof kasta oo aan deganayn Colorado/Shakhsi caalami ah ayaa dib loogu eegi doonaa gundhiga kiis-ilaa-kiis si loo go'aamiyo u qalmitaanka. Kooxda dib u eegista waxa ku jiri doona maareeyaha hawlgalada Helitaanka Bukaanka, Maareynta Kiiska, Agaasimaha fulinta ee Wareegga Dakhliga, iyo xubnaha kale ee kooxda CHCO marka ay habboon tahay.
   3) Bukaanka/qoyska ayaa ku guuldareysta inay u hoggaansamaan shuruudaha codsiga ee barnaamijyada kale (tusaale, Medicaid, CICP, qorshooyinka kala badelka, iwm.).
   4) Bukaanka/qoyska ayaa ku guuldareysta inay buuxiyaan codsiga/ku bixiyaan macluumaadka loo baahan yahay 365 maalmood gudahooda ee bayaanka biil bixinta ugu horreeya.
   5) Adeegyada iyo kharashyada qaarkood sida caadiga ah laguma daboolo Barnaamijka Daryeelka Samafalka ee CHCO, oo ay ku jiraan kuwa soo socda:
      a. Ku-tallaalidda, inkastoo laga yaabo in la daboolo haddii qiimaynta caafimaadka ee loo baahan yahay ee daryeelka caafimaad ee aan degdegga ahayn ay muujiso in bukaanka u hoggaansami karo shuruudaha caafimaadka talaalida ka dib.
      b. Habraacyada uu diiday bixiyaha caymiska caafimaadka sida dheefaha "aan la daboolin" (marka laga reebo haddii ay la xiriirto Ka reebitaanka Shahaada siinta Xarunta Cusub ee kor lagu soo qeexay), oo ay ku jiraan:
         - Adeegyada la bixiyay ka hor inta aan oggolaansho laga helin caymiska bukaanka;
         - Habraacyada tijaabinta;
         - Adeegyada ay u diidaan bixiyayaasha u hoggaansanaan la'aanta xubinta darteeda (tusaale, isku dubarida dheefaha ee aan la soo gudbin).
      c. Adeegyada la xiriira daraasaadka cilmi-baarista ama loo sameeyay si waafaqsan maalgelinta deeqda.
      d. Adeegyada lagu daboola heshiisyada hal kiis oo kaliya.

E. Waaxda La talinta Dhaqaalaha waa awoodda ugu dambeysa ee go'aaminta in CHCO ay samaysay dadaallo macquul ah iyada oo loo eegayo shuruudaha IRS iyo Gobolka Colorado si loo go'aamiyo in shakhsigu u qalmo Caawimaad Dhaqaale.
   1) **Ogaysiis:** CHCO waxay wax ka badelid ku samayn kartaa Barnaamijka Daryeelka Samafalka ee CHCO iyo/ama FAP wakhti kasta ogaysiis la'aan.

2. Macluumaadka U qalmitaanka Dakhliga

A. Heerka Saboolnimada Dowladda dhexe (FPL) jaantuska hagitaanada dakhliga waxaa loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo Barnaamijka Daryeelka Samafalka ee CHCO Hagitaanada Dakhliga ugu Badan ee Sannadlaha ah. Macluumaadka halkan lagu bixiyo waxaa la cusboonaysiiyaa Febraayo sannad kasta.

Tirada Qoyska	Dakhliga Sannadlaha ah ee FPL	Dakhliga Sannadlaha ah ee 250% FPL	*Dakhliga Sanadlaha ah ee *500% FPL*
1	$13,590	$33,975	$65,465
2	$18,310	$45,775	$88,435
3	$23,030	$57,575	$111,405
4	$27,750	$69,375	$134,375
5	$32,470	$81,175	$157,345
6	$37,190	$92,975	$180,315
7	$41,910	$104,775	$203,285
8	$46,630	$116,575	$226,255

Qiimaynta Sadaqada	Boqolkiiba Heerka Saboolnimada Dowladda dhexe
N	40%
A	62%
B	81%
C	100%
D	117%
E	133%
F	159%
G	185%
H	200%
I*	250%
Z**	40%

* Boqolkiiba Heerka Saboolnimada Dowlada dhexe ee Qiimaynta Sadaqada I ee 500% waxa lagu dabaqi doonaa oo kaliya bukaanada ka helaya adeegyada goob cusub oo la shahaado-siiyey sida kor lagu soo sharaxay, iyo kaliya 120 maalmood kadib taariikhda dhaqan galka CCN.

** Qiimaynta Z waxaa loogu talagalay macaamiisha hoylaawayaasha ah.

3. Siyaasadda Biilida iyo Ururinta
   A. CHCO waxay raadin doontaa lacag bixinta ku saabsan koontooyinka Iskii u bixinta oo leh haraayada (tusaale ahaan, deymaha bukaanka). CHCO ma bilaabi doonto ECA-yada ka hor inta aysan samayn dadaallo macquul ah si ay u go'aamiyaan in Caawimaada Dhaqaalaha la heli karo iyo/ama dadaallada ururinta laga dabagalay. Bayaan kasta oo qeexan oo uu codsado dammaanad qaade waxaa lagu siin doonaa 10 maalmood gudahooda oo ah codsigan oo kale, iyada oo la raacayo Xeerka Dib loo eegay ee Colorado § 25-3-112.
   B. CHCO waxay samayn doontaa dadaalo macquul ah oo lagu ogaysiinayo bukaanada iyo qoysaska
      wax ku saabsan FAP iyada oo loo marayo hababka soo socda:
      1) Oraah ahaan u ogaysii shakhsiyaadka wax ku saabsan FAP iyo sida loo helo caawimaada leh hannaanka codsiga.
      2) CHCO waxay ka fogaan doontaa bilaabista ECA-yada mudda ugu yaraan 120 maalmood ah laga soo bilaabo taariikhda CHCO ay bixiso bayaanka biil bixinta ugu horeysa ee ka dib soo saarida ee loogu talagalay daryeelka.
      3) CHCO waxay soo diri doontaa ugu yaraan saddex ogaysiis oo biil bixinta bil kasta ah, 30 maalmood kasta, dammaanad qaadaha koontada isaga ok lagu wargelinaya baaqiga ku haray.
         a. Ogaysiiska Koowaad waxa uu ku wargelinayaa dammaanad qaadaha in uu jiro haraa la filaayo oo aan wali la bixin oo koontada ku jira;
         b. Ogaysiiska Labaad waxa uu xasuusinayaa Dammaanad qaadaha haraaga sii socda ee aan wali la bixin;
         c. Ogaysiiska kama dambaysta ah ee koontada deynta la dhaaftay waxay ogaysiinaysaa dammaanad qaadaha in isaga/iyada ay haystaan soddon (30) maalmood si uu dib ugu xalliyo deynta, ama ECA-yada laga yaabo in lagu qaado deynta oo ay qeexi doonto ECA-yada in ay CHCO doonayso inay qaadato oo ay ku darto nuqul ka mid ah nuqulka soo koobida luqadda cad.

- Ogaysiis: Koontada waxaa lagu bixin karaa si buuxda, lagu dejin karaa qorshaha lacag bixinta, loo tixraaci karo la talin dhaqaale, ama macluumaad dheeraad ah oo caymis ah oo la helay inta lagu guda jiray muddada waqtigan. Ogaysiiska luqadda cad ee CHCO's FAP waxaa lagu bixiyaa Af-Ingiriis iyo Af-Isbaanish labadaba bayaanka kasta oo biil ah.

4) Kadib markii saddex ogaysiis oo biil ah lagu soo diray oo aan wax lacag ah lagu helin 60 maalmood gudahooda ee Ogaysiiska ugu Dambeeya, koontada waxaa loo badeli karaa Deyn Xun waxaana laga yaabaa in ECAs la qaato.
   a. Koontooyinka waxay u qalmaan Deynta Xun marka aan la bixin haraaga bukaanka (tusaale ahaan, Iskii u bixinta) CHCO ay samaysay dadaallo macquul ah, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn wicitaanada taleefanada, bayaannada ama waraaqaha, si ay u go'aamiyaan in shakhsigu u qalmo Caawimaada Dhaqaale.
   b. Hay'ada deynta xun waxay ku wargalin doontaa xafiiska deymaha 60 maalmood ka dib markii koontada la geliyo hay'ada noocaan ah deynta xun haddi wax talaaba ah uusan qaadin dammaanad qaadaha si loo xaliyo haraaga ha ahaato bixinta lacagta ama soo gudbinta macluumaad khilaaf oo dheeraad ah.
   c. Haddii dhammaan xulashooyinka kale ee lacag bixinta la qaatay oo koontada ku jirta Deynta Xun ay da'deedu ka weyn tahay 60 maalmood iyada oo aan lala xiriirin dammaanad qaadaha ama dammaanad qaadaha uu diido xallinta haraaga, tallaabo sharci ah ayaa laga qaadi karaa.
5) Bilaabida Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha
   a. Muddada codsashada ee loogu talagalay Caawimaada Dhaqaalaha waxay dhammaan doontaa waqti aan ka horraynin 240 maalmood laga bilaabo biilka ugu horreeya ee booqashada kadib.
6) Dhammaan dhinacyada ku hawlan hawlaha ururinta ee ku aadan CHCO-da waxay raaci doonaan siyaasaddan.

4. Qadarada Guud ahaan la Dalacsiiyay
   A. CHCO waxay xadidaysaa lacagta lagu dulsaaro daryeelka ay siiso shaqsi kasta oo u qalma caawimaada hoos timaada FAP-geeda. Lacagaha lagu soo dallaco adeegyada caafimaadka degdega ah iyo caafimaadka lagama maarmaanka u ah bukaanada u qalma Caawimaada Dhaqaale waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo lagu salaynayo habka dib u eegista oo kama badnaan doonto AGB shaqsiyaadka leh caymis daboolaya daryeelka noocaan oo kale ah.
   CHCO waxa ay isticmaalaysaa habka "dib-u-eegis" ee ku salaysan sheegashooyinka dhabta ah ee la soo dhaafay ee la siiyay xarunta isbitaalka oo ay ku bixisay kharashka loogu talagalay adeega Medicare oo ay la socdaan dhammaan caysanayaasha caafimaadka gaarka ah oo bixinaya sheegashada xarunta isbitaalka (ay ku jiraan, xaalad kasta, qayb kasta oo la xiriirta sheegashooyinkan ay bixiyeen ka-faa'iideystayaasha Medicare ama shaqsiyaad caysan). CHCO waxay xisaabineysaa boqolkiiba AGB xarun kasta waxayna isticmaashaa boqolkiiba ugu hooseeya dhammaan xarumaha, taas oo ah 58.38%. Boqolkiiba AGB ayaa dib loo eegi doonaa waxaana la cusboonaysiin doonaa maalinta 120-aad ee ka dambaysa muddada 12-ka bilood ah ee xarunta isbitaalka loo isticmaalo xisaabinta AGB-ga boqolkiiba, oo ah Abriil sannad kasta marka la joogo CHCO.

5. Macluumaadka Bixiyaha
   A. Go'aaminta u qalmitaanka Caawimaada Dhaqaale waxa sidoo kale lagu dabaqi doonaa adeegyada xirfadeed ee bixiyayaasha ku xiran Jaamacadda Colorado School of Medicine oo ay soo dallacaan Dhakhaatiirta Jaamacadda, Inc. Daawada d/b/a CU.
   1) Khidmadaha loogu talagalay adeegyada xirfadeed ee bixiyayaasha ku xiran ururada soo socda ma dabooli doono Barnaamijka Daryeelka Samafalka ee CHCO. Ururadani waxa laga yaabaa in ay leeyihiin siyaasado caawimaad dhaqaale oo iyaga u gaar ah oo su'aalahana waa in uu bukaanka si toos ah ugu sameeyo ururadan.
      a. Xirfadlayaasha Raajada Shucaaca ee TCH
      b. La-taliyayaasha Raajada Shucaaca & Sawir qaadista, P.C. (RIC)
      c. Shaybaarka Daawada Cudurrada ee Jaamacadda
      d. Kooxda Caafimaadka ee Poudre Valley, LLC d/b/a UC Kooxda Caafimaadka (UCHMG)

6. Caawimaada iyo Hababka loo Codsado
   A. Codsiyada iyo caawimaada buuxinta codsiyada waxaa lagu heli karaa si bilaash ah: 1) Onlayn (http://www.childrenscolorado.org/about/your-bill); 2) Si fool-ka-fool ah:
      a. Xarunta Caafimaadka ee Anschutz oo ku taala 13123 East 16th Avenue, Aurora, CO 80045, ama
      b. Isbitaalka Colorado Springs ee 4090 Briargate Parkway, Colorado Springs, CO 80920; ama

   3) Adiga oo ka wacaayo Waaxda La talinta Dhaqaalaha 720-777-7001 ama Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka 720-777-6422; ama

7. Helitaanka Soo koobitaanka Siyaasadda iyo Luuqadda Fudud
   A. Nuqul ka mid ah siyaasaddan iyo soo koobitaanka luqadda fudud ayaa lagu heli karaa si bilaash ah:
      1) Onlayn (http://childrenscolorado.org/your-visit/insurance-financial-resources/financial
         a. Xarunta Caafimaadka ee Anschutz oo ku taala 13123 East 16th Avenue, Aurora, CO 80045, ama
         b. Isbitaalka Colorado Springs ee 4090 Briargate Parkway, Colorado Springs, CO 80920; ama
      3) Adiga oo ka wacaayo Waaxda La talinta Dhaqaalaha 720-777-7001 ama Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka 720-777-6422; ama
      4) Iimayl ahaan pfs@childrenscolorado.org

TIXRAACYADA
26 CFR 1.501(r)-0 ilaa 26 CFR 1.501(r)-7 https://www.irs.gov/pub/irs-irbs/irb15-05.pdf

LIFAAQYADA
Dib raaca A - Hagitaanka Dhigaalka Iskii uu Bixinta
Xirmada Ilkaha
Liiska Warbixinta Caawimaada Dhaqaalaha
Caawimaada Dhaqaalaha iyo Macluumaadka Qorshaha Lacag-bixinta

DUKUMENTIYADA LA XIRIIRA
Aan Midabakoor ku lahayn Bukaanada
EMTALA (Xeerka Daawaynta Caafimaadka Degdegga ah iyo Shaqada).
Jadwaleynta Shaqsiga Caalamiga ah iyo Bixinta Dhaqaalaha
Heshiiska Iskii u bixinta - Ingiriis
Heshiiska Iskii u bixinta - Isbaanish
Siyaasadda Caawimaada Dhaqaalaha (FAP) - Dadweynaha guud Siyaasadda_Spanish
Siyaasadda Caawimaada Dhaqaalaha (FAP) - Dadweynaha guud Siyaasadda_Arabic
Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha - Arabic
Siyaasadda Caawimaada Dhaqaalaha (FAP)-Dadweynaha guud_Siyaasadda_Amharic
Caawimaada Dhaqaalaha iyo Qorshaha Lacag-bixinta Macluumaadka_Amharic
Caawimaada Dhaqaalaha Codsiga_Amharic
Siyaasadda Caawimaada Dhaqaalaha (FAP) - Dadweynaha guud Siyaasadda_Nepali
Caawimaada Dhaqaalaha iyo Qorshaha Lacag-bixinta Macluumaadka_Nepali
Caawimaada Dhaqaalaha Codsiga_Nepali
Siyaasadda Caawimaada Dhaqaalaha (FAP) - Dadweynaha guud Siyaasadda_Somali
Caawimaada Dhaqaalaha iyo Qorshaha Lacag-bixintaMacluumaadka_Somali
Caawimaada Dhaqaale Codsiga_Somali

Waxaa dib u eegis ku sameeyay: Guddiga Maamulka Siyaasadda iyo Habraaca, Kimberly Bruntz (Kormeeraha Hawlaha), Sarah Heifets (Siyaasadda & U doodista Coord Sr)

"Nooca rasmiga ah ee CHCO P&P kasta waa nuqulka eletrooniga ah ee lagu soo diray intranetka. Nuqullada daabacan ee siyaasadaha looga baahan yahay ujeedo kasta oo sharci ah waa in laga soo daabacaa intranetka ama wakhtiga loo baahan yahay u dhaw."

CHCO/CU DAAWADA CICP iyo Jadwalka Lacagta canshuurta Samafalka

Booqashada Rugta Caafimaadka Bukaan-socodka (Daryeelka Aasaasiga ah iyo Ka hortagga, CHC, ADO, MED, YM, CAMP)

Qiimaynta	Sadaqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU MED	Wadarta guud
0-40%=N	$7	$7	**$14**	$7	$0	**$7**
41-62%=A	$15	$15	**$30**	$15	$0	**$15**
63-61%-B	$15	$15	**$30**	$15	$0	**$15**
82-100%=C	$20	$20	**$40**	$20	$0	**$20**
101-117%=D	$20	$20	**$40**	$20	$0	**$20**
118-133%=E	$25	$25	**$50**	$25	$0	**$25**
134-159%=F	$25	$25	**$50**	$25	$0	**$25**
160-185%=G	$35	$35	**$70**	$35	$0	**$35**
186-200%=H	$35	$35	**$70**	$35	$0	**$35**
201-250%=I	$40	$40	**$80**	$40	$0	**$40**
0%-Z	$0	$0	**$0**	$0	$0	**$0**

Booqashada Rugta Bukaan-socodka ee Gaarka ah (Daryeelka caafimaad ee gaarka ah Kansarka, Qalliinka Lafaha, CCBD, Wadnaha, iwm.)

Qiimaynta	Sadqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU Med	Wadarta guud
0-40%=N	$15	$15	**$30**	$15	$0	**$15**
41-62%=A	$25	$25	**$50**	$25	$0	**$25**
63-81%=B	$25	$25	**$50**	$25	$0	**$25**
82-100%=C	$30	$30	**$60**	$30	$0	**$30**
101-117%=D	$30	$30	**$60**	$30	$0	**$30**
118-133%=E	$35	$35	**$70**	$35	$0	**$35**
134-159%=F	$35	$35	**$70**	$35	$0	**$35**
160-185%=G	$45	$45	**$90**	$45	$0	**$45**
186-200%=H	$45	$45	**$90**	$45	$0	**$45**
201-250%=I	$50	$50	**$100**	$50	$0	**$50**
0%-Z	$0	$0	**$0**	$0	$0	**$0**

Adeegyada Kaabayaasha ah (XR, PFT, Ultraund, Wax ka qabashada Raajada Shucaaca, Tijaabada Cadaadiska, Tijaabada Hidda Sidaha)

Qiimaynta	Sadaqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU Med	Wadarta guud
0-40%=N	$15	$0	**$15**	$15	$0	**$15**
41-62%=A	$25	$0	**$25**	$25	$0	**$25**
63-81%=B	$25	$0	**$25**	$25	$0	**$25**
82-100%=C	$30	$0	**$30**	$30	$0	**$30**
101-117%=D	$30	$0	**$30**	$30	$0	**$30**
118-133%=E	$35	$0	**$35**	$35	$0	**$35**
134-159%=F	$35	$0	**$35**	$35	$0	**$35**
160-185%=G	$45	$0	**$45**	$45	$0	**$45**
186-200%=H	$45	$0	**$45**	$45	$0	**$45**
201-250%=I	$50	$0	**$50**	$50	$0	**$50**
0%-Z	$0	$0	**$0**	$0	$0	**$0**

Seexinta Bukaan-jiifka, Kormeerka, Bukaan-socod Sariirta saaran iyo Daraasaadka Hurdada

Qiimaynta	Sadaqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU MED	Wadarta guud
0-40%=N	$15	$7	$22	$15	$7	$22
41-62%=A	$65	$35	$100	$65	$35	$100
63-81%=B	$105	$55	$160	$105	$55	$160
82-100%=C	$155	$80	$235	$155	$80	$235
101-117%=D	$220	$110	$330	$220	$110	$330
118-133%=E	$300	$150	$450	$300	$150	$450
134-159%=F	$390	$195	$585	$390	$195	$585
160-185%=G	$535	$270	$805	$535	$270	$805
186-200%=H	$600	$300	$900	$600	$300	$900
201-250%=I	$630	$315	$945	$630	$315	$945
0%-Z	$0	$0	$0	$0	$0	$0

Qalliinka Bukaan-socodka

Qiimaynta	Sadaqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU Med	Wadarta guud
0-40%=N	$15	$7	**$22**	$15	$7	**$22**
41-62%=A	$65	$35	**$100**	$65	$35	**$100**
63-81%=B	$105	$55	**$160**	$105	$55	**$160**
82-100%=C	$155	$30	**$235**	$155	$80	**$235**
101-117%=D	$220	$110	**$330**	$220	$110	**$330**
118-133%=E	$300	$150	**$450**	$300	$150	**$450**
134-159%=F	$390	$195	**$585**	$390	$195	**$585**
160-185%=G	$535	$270	**$805**	$535	$270	**$805**
186-200%=H	$600	$300	**$900**	$600	$300	**$900**
201-250%=I	$630	$315	**$945**	$630	$315	**$945**
0%-Z	$0	$0	**$0**	$0	$0	**$0**

Adeegyada Bukaan-socodka (CT. MRI, PET, EMG. Shaybaarka Cath, Nuc Med)

Qiimaynta	Sadaqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU Med	Wadarta guud
0-40%=N	$30	$22	$52	$30	$22	$52
41-62%=A	$90	$50	$140	$90	$50	$140
63-81%=B	$130	$80	$210	$130	$80	$210
82-100%=C	$185	$110	$295	$185	$110	$295
101-117%=D	$250	$140	$390	$250	$140	$390
118-133%=E	$335	$185	$520	$335	S185	$520
134-159%=F	$425	$230	$655	$425	$230	$655
160-185%=G	$580	$315	$895	$580	$315	$895
186-200%=H	$645	S345	$990	$645	$345	$990
201-250%=I	$680	$365	$1,045	$880	$365	$1,045
0%-Z	$0	$0	$0	$0	$0	$0

ED & Daryeelka Degdegga ah

Qiimaynta	Sadaqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU MED	Wadarta guud
0-40%=N	$15	$7	$22	$15	$7	$22
41-62%=A	$25	$35	$60	$25	$35	$60
63-81%=B	$25	$55	$80	$25	$55	$80
82-100%=C	$30	$80	$110	$30	$80	$110
101 -117%=D	$30	$110	$140	$30	$110	$140
118-133%=E	$35	$150	$185	$35	$150	$185
134-159%=F	$35	$195	$230	$35	$195	$230
160-185%=G	$45	$270	$315	$45	$270	$315
186-200%=H	$45	$300	$345	$45	$300	$345
201-250%=I	$50	$315	$365	$50	$315	$365
0%-Z	$0	$0	$0	$0	$0	$0

Rijeetada daawada iyo Dukaanka indhaha

Qiimaynta	Sadaqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU Med	Wadarta guud
0-40%=N	$5	$0	$5	$5	$0	$5
41-62%=A	$10	$0	$10	$10	$0	$10
63-81%=B	$10	$0	$10	$10	$0	$10
82-100%=C	$15	$0	$15	$15	$0	$15
101-117%=D	$15	$0	$15	$15	$0	$15
118-133%=E	$20	$0	$20	$20	$0	$20
134-159%=F	$20	$0	$20	$20	$0	$20
160-185%=G	$30	$0	$30	$30	$0	$30
186-200%=H	$30	$0	$30	$30	$0	$30
201-250%=I	$35	$0	$35	$35	$0	$35
0%-Z	$0	$0	$0	$0	$0	$0

Shaybaarka Bukaan-socodka

Qiimaynta	Sadaqo			CICP		
	CHCO	CU Med	Wadarta guud	CHCO	CU Med	Wadarta guud
0-40%=N	$5	$0	**$5**	$5	$0	$5
41-62%=A	$10	$0	**$10**	$10	$0	$10
63-81%=B	$10	$0	**$10**	$10	$0	$10
82-100%=C	$15	$0	**$15**	$15	$0	$15
101-117%=D	$15	$0	**$15**	$15	$0	$15
118-133%=E	$20	$0	**$20**	$20	$0	$20
134-159%=F	$20	$0	**$20**	$20	$0	$20
160-185%=G	$30	$0	**$30**	$30	$0	$30
186-200%=H	$30	$0	**$30**	$30	$0	$30
201-250%=I	$35	$0	**$35**	$35	$0	$35
0%-Z	$0	$0	**$0**	$0	$0	$0

Lacagta canshuurta bukaan-jiifka iyo qalliinka bukaan-socodka ee isbitaalka ayaa looga baahan yahay khidmadaha la xiriira adeegyada aan dhakhtarka ahayn (xarun) ee lagu bixiyo inta lagu jiro daryeelka isbitaalka ee loogu talagalay sii wadashada joogitaan ee ah 24 saacadood ama ka badan ama Qalliinka Buukaan-socodka ee loogu talagalay hannaanka qalliinka ee uu helo macmiilka la dhigay oona laga soo saaray goobta isbitaalka isla maalintaas.

Lacagta canshuurta bukaan-jiifka iyo dhakhtarka qolka gurmadka degdega ah ayaa looga baahan yahay kharashyada la xiriira adeegyada uu si toos ah dhakhtarku ugu bixiyo goobta isbitaalka, oo ay ku jirto daryeelka qolka gurmadka degdega ah.

Lacagta canshuurta Rugta Caafimaadka Bukaan-socodka ayaa looga baahan yahay kharashyada la xiriira kuwa aan dhakhtar ahayn (xarunta) iyo adeegyada dhakhtarka ee laga helo goobta rugta caafimaadka bukaan-socodka. Tan waxaa ka mid ah kharashyada loogu talagalay daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyo ka hortagga. Kuma jiraan kharashyada loogu talagalay adeegyada bukaan-socodka ee lagu bixiyo isbitaalka (tusaale ahaan, daryeelka qolka gurmadka degdega ah, qaliinka bukaan-socodka, raajada shucaaca).

Lacagta canshuurta qolka Gurmadka Degdegga ah ee isbitaalka waxa looga baahan yahay khidmadaha la xiriira adeegyada aan dhakhtarka ahayn (xarun) ee lagu bixiyo inta la helaayo daryeelka goobta isbitaalka ee loogu talagalay sii wadida joogitaanka wax ka yar 24 saacadood, oo ay ku jirto Qolka Gurmadka Degdegga ah.

Lacagta canshuurta Rugta caafimaadka Bukaan-socodka ee Takhasuska leh ayaa looga baahan yahay khidmadaha la xiriira kuwa aan dhakhtar ahayn (xarun) iyo adeegyada dhakhtarka ee lagu helo goobta rugta caafimaadka bukaan-socod ee takhasuska leh. laakiin kuma jiraan khidmadaha loogu talagalay adeegyada bukaan-socodka ee lagu bixiyo goobta isbitaalka (tusaale ahaan, dhakhtarka qolka gurmadka degdega ah qalliinka bukaan-socodka). Khidmadaha Bukaan-socodka Takhasuska leh waxaa ka mid ah daryeel caafimaad oo gaar ah (sida, kansarka, dhakhaatiirta lafaha, dhiigbaxa, sambabada) oo aan caadi ahaan loo heli karin sida daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ah iyo ka hortagga.

Lacagaha canshuurta rijeetada daawada ayaa looga baahan yahay daawooyinka rijeetada lagu soo qora ee laga helo farmashiyaha bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee u qalma CICP.

Lacagta canshuurta Adeegyada Shaybaarka ayaa looga baahan yahay khidmadaha la xiriira baaritaanada shaybaarka ee uu helay macmiilku ee aan la xiriirin xarunta bukaan-jiifka ama khidmada bukaan-socodka isbitaalka inta lagu guda jiro muddada isla muddadaas: adeegyada raajada shucaaca iyo sawirka ee goobta rugta caafimaadka

Macaamiisha Adeegyada Bukaan-socodka- '"La kordhiyey'" ee helaaya Sawir qaadista Magnetic Resonance(MRI). Kombiyuutar Saarida Jirka (CT) Qalabka Lagu Iskaangareeyo cudurada unugyada ku jira (PET). Daraasadaha Jiifka Shaybaarka Catheterization-ka (Cath Lab), ama adeegyada kale ee Daawooyinka Nukliyeerka ee ka jira Goobaha Bukaan-socodka ayaa ka mas'uul ah lacagta canshuurta taas oo ka muuqata jaantuska.

Adeegyada Caawinta ah waa adeegyo lagu sameeyo CHCO bannaanka Rugta Daryeelka Aasaasiga ah ee Takhasuska ah. Bukaan-jiifka, Bukaan-socodka. Qalliinka Bukaan-socodka. ED ama booqashooyinka Daryeelka Degdegga ah (tusaale, raajada (filimada fidsan). ultrasounds, tijaabooyinka cadaadiska, tijaabada shaqada sambabada. ECG. Iwm.)